

Maareeyaha Ilaalinta Cuntada ee Shahaadaysan Cuntada ee Minnesota

WAAJIBAADKA, TABABARKA, IYO SHURUUDAHA

Waxaad internet-ka ka raadin kartaa koorsooyinka bilowga ah, imtixaannada, iyo waxbarashada sii socota. Initial Courses, Exams and Continuing Education

Wajibaadka

Maareeyaha Ilaalinta Cuntada ee Shahaadaysan (Certified Food Protection Manager – CFPM) waa inuu leeyahay aqoon, xirfad iyo karti uu ku gutto wajibaadyada hoos ku xusan:

- Aqoonsiga khataraha ka dhalan kara hawlmaalmeedka maqaaxida ama goobta cuntada laga sameeyo.
- Horumarinta ama hirgelinta siyaasado, habraacyo ama heerar lagu xakameynayo cudurrada laga qaado cuntada.
- Isku dubaridka tababarada badbaadada cuntada ee shaqaalaha, hagidda hawlaha diyaarinta cuntada, iyo qaadashada tallaabooyin saxiix ah marka loo baahdo si loo ilaaliyo caafimaadka macaamiisha.
- Dhamaystirka kormeerro gudaha ah oo maalinle ah si loo hubiyo in la raacayo siyaasadaha iyo habraacyada badbaadada cuntada.

Tababarka Looga Baahan Yahay

Koorasyada tababarka ee la ansixiyay ee loogu talagalay helitaanka shahaadada CFPM markii ugu horreysay ama cusboonaysiinteeda waxaa bixiya shirkado gaar loo leeyahay, kulliyadaha bulshada iyo farsamada, iyo hay'ado gaar oo wakiilnimo haysta. Waaxda Caafimaadka Minnesota (MDH) ma bixiso tababar toos ah, balse waxay ansixisaa tababar-bixiyeyaasha iyo koorasyada.

Shahaadada Bilowga ah

Haddii aadan horey u aheen Maareeye Ilaalinta Cuntada ee shahaadaysan (CFPM) ee Minnesota:

1. Ka qeybgal kooras tababar ah oo la ansixiyay, kana gudub imtixaanka la oggolaaday.
2. Buuxi codsiga khadka tooska ah ee bilowga ah, soo geli nuqulka shahaadada imtixaanka, kuna lifaaq lacagta codsiga oo ah \$35.

Apply Online - Initial Application.

Codsigaaga CFPM ee Minnesota waa in la gudbiyaa ugu dambeyn lix (6) bilood gudahood markaad gudubto imtixaanka.

Dib-u-Cusboonaysiinta Shahaadada

Shahaadada CFPM ee Minnesota waxay dhacaysaa saddex sano kadib taariikhda dhaqan-galka ee ku qoran shahaadada ay bixiso MDH. Si aad u cusboonaysiiso shahaadada:

1. Dhammee ugu yaraan afar (4) saacadood oo kooras tababar ah oo la ansixiyay.
2. Contact us Nala soo xiriir si aad u hesho tilmaamaha iyo kood gaar ah (claim code) oo lagama maarmaan u ah cusboonaysiinta diiwaankaaga.
3. Buuxi codsiga dib-u-cusboonaysiinta ee khadka tooska ah, soo geli shahaadada

tababarka ee la ansixiyay, kuna lifaaq
lacagta \$35.

Apply Online - Renewal Application.

Qaado tababarka dib-u-cusboonaysiinta inta
lagu jiro muddada ansaxnimada ee shahaadada.
Codso cusboonaysiin ugu dambayn lix (6) bilood
gudahood marka ay dhacdo taariikhda ku qoran
shahaadada MDH.

Intixaannada La Ansixiyay

Codsadayaasha doonaya inay helaan
shahaadada CFPM markii ugu horreysa waa inay
keenaan caddeyn muujinaysa in ay ka gudbeen
imtixaan ay bixisay hay'ad ay aqoonsatay
Barnaamijka Shahaado-siinta ee ANSI-CFP
Accreditation Program.

Su'aalo Badan La Isweydiyo

Wixii faahfaahin dheeraad ah ee la xiriira
xeerarka deegaanka ama sida Xeerka Cuntada
ee Minnesota (Minnesota Food Code) uu u
khuseeyo goobtaada, fadlan la xiriir hay'adda
bixisa ruqsadda ee ku shaqada leh goobtaada
ganacsi.

Ma ku gudbin karaa codsi warqad ah si aan u helo ama u cusboonaysiiyo shahaadada CFPM?

Laga bilaabo Abriil 1, 2025, codsiyada warqadda
ah lama aqbali doono. Si aad u codsato, buuxi
codsiga bilowga ah ama dib-u-cusboonaysiinta,
soo geli dukumentiyada lagama maarmaanka
ah, oo ku bixi lacagta khadka tooska ah adigoo
adeegsanaya bogga Certified Food Protection
Manager Registration – Apply Online portal ama
iskaanka samee QR code-ka hoose si aad onleen
ahaan uga codsato.



Certified Food Protection Manager
Application ([https://mn-](https://mn-mdh.portal.opengov.com/categories/1087/record-types/6498)
[mdh.portal.opengov.com/categories/1087/](https://mn-mdh.portal.opengov.com/categories/1087/record-types/6498)
[record-types/6498](https://mn-mdh.portal.opengov.com/categories/1087/record-types/6498))

Ma khasab baa in aniga oo ah milkiilaha goobta cuntada aan noqdo CFPM?

Maya. In kasta oo milkiileyaal badan doortaan
inay iyagu noqdaan Maareeyaha Ilaalinta
Cuntada ee Shahaadaysan (CFPM) ee
goobtooda, arrintaas looma baahna sharciyan.
CFPM wax ku ool ah waa qof si wanaagsan u
fahamsan habka shaqo ee goobtaada cuntada
isla markaana haysta awood uu ku fuliyo
wajibaadka CFPM ee goobtaas.

Imisa CFPM ayaa looga baahan yahay goob cuntada lagu kariyo ama lagu iibiyo?

Xeerka cuntada ee Minnesota wuxuu farayaa in
goob kasta oo cuntada u baahan ruqsad laga
helo ay shaqaalaysiiyo hal CFPM. Hay'adaha
deegaanka qaarkood waxay yeelan karaan
shuruudo dheeraad ah.

Ma noqon karaa CFPM u ah in ka badan hal goob ganacsi?

Maya.

Muddo intee le'eg ayaan haystaa si aan u shaqaaleysiyo ama u tababaro CFPM cusub?

Xeerka cuntada ee Minnesota wuxuu farayaa in goob cusub oo cunto laga shaqeeyo ay yeelato CFPM shaqaale ka tirsan ugu dambeyn 60 maalmood gudahood marka la furo. Ka hor intaadan bilaabin howlgalka goobtaada, waa inaad haysataa ugu yaraan hal shaqaale oo ka gudbay imtixaan la ansixiyay ama horey uga codsaday shahaadada CFPM ee Minnesota. Hay'adaha deegaanka qaarkood waxay yeelan karaan shuruudo dheeraad ah.

Ma jiraan wax ka reeban shuruudaha CFPM?

Haa, qaar ka mid ah goobaha cuntada—iyagoo ku saleysan nooca ruqsadda ama nooca hawlaha diyaarinta cuntada—waxay ka reeban yihiin shuruudaha CFPM ee Minnesota.

Goobaha laga yaabo inay ka mid noqdaan kuwa laga dhaafay waxaa ka mid ah:

- Goobaha cuntada ee khatarta hoose leh
- Goobaha cuntada ee munaasabadaha gaarka ah
- Baabuurta cuntada lagu iibiyo, dhismooyinka la qaadi karo, ama gaari-gacmeedyada

Intaa waxaa dheer, goobaha cuntada waxaa laga dhaafi karaa CFPM haddii hawlahaada diyaarinta cuntada ay ku egyihiin:

- Diyaarinta ama baakaynta cuntooyin ama agab cuntoyeed aan u baahnayn kantarool wakhti/heerkul (non-TCS food).
- Kuleylinta ama adeegga cunto hore loo kariyay sida hot dog, suusiso, popcorn, nachos, pretzels, ama pizza barafaysan.
- Ka shaqeynta hilibka ceeriin, digaaga, kalluunka ama xayawaanka la ugaarsaday ee loo diyaariyay in macaamilka uu isagu karis u sameeyo

Liiska buuxa ee ka reebista CFPM waxaa laga helaa Xeerarka Minnesota, qaybta 4626.0033, qodobka C.

Khayraadka

Minnesota Department of Health Food Business Safety (www.health.state.mn.us/foodbizsafety)

Initial Courses, Exams and Continuing Education (<https://fmctraining.web.health.state.mn.us/search/index.cfm>)

ANSI-CFP Accreditation Program (www.ansi.org/Accreditation/credentialing/personnel-certification/food-protection-manager/ALLdirectoryListing?menuID=8&prgID=8&statusID=4)

Certified Food Protection Manager Registration – Apply Online (<https://mn-mdh.portal.opengov.com/categories/1087/record-types/6498>)

Minnesota Department of Health
Food, Pools, and Lodging Services
PO Box 64975
St. Paul, MN 55164-0975
651-201-4500
health.foodlodging@state.mn.us
www.health.state.mn.us

Minnesota Department of Agriculture
Food and Feed Safety Division
625 Robert Street N
St. Paul, MN 55155-2538
651-201-6027
MDA.FFSD.Info@state.mn.us
www.mda.state.mn.us

APRIL 2025

Si aad macluumaadkan ugu hesho qaab kale, fadlan wac: 651-201-4500 ama 651-201-6000. Waxaa lagu daabacay warqad dib loo warshadeeyay.